## Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

**WAR-SAXAAFADEED 002/2010**

# Ergaygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud oo cambaareeyey werarka lagu qaaday Isbitaalka AMISOM

Nayroobi, 26 Jenaayo 2010 – Ergaygga Gaarka ah ee Qarammadda Middobay u Qaabilsan Arrimmaha Soomaaliya, Ahmedou Ould-Abdullah ayaa cambaareeyey werarkii xagjirayaashu shelay ku qaadeen isbitaal ku yaala Garoonka Diyaaradaha Mogadishu gadaashiisa. Isbitaalkaas oo ay gacanta ku haayaan Ciidamad Nabad Ilaalinta Ururka Midowga Afrika (AMISOM), werarkaas oo si gaar ah loogu dilay- dad Soomaali ah oo aan waxba galabsan oo bukaan ah.

Werarkaani waa kii labaad oo lagu soo qaado xarun caafimaad ee ku hawlan daaweynta dadka Soomaaliyeed ee raydka ah, kuwas oo daawo ka helaya Dakhaatiir Afrikaan ah. Isbitaalka oo la furo maalmo dhoor ah todobaadkiiba , waxaa lagu daweeyaa dad gaaraya 3200 oo Soomaali ah bilwalba, dad kaas oo ay ku jiraan carur iyo haween. Xaruuntan iyo xaruumaha kale ee caafimaadka waxay gabaad u yihiin dadka rayidka ah ee ku soo dhaawacma dagaalka aan loo meeldayin ee ka socda Muqdisho.

Falkaan fulanimada ah wuxuu wax ku sii kordhinayaa oo kaliya dhibaataa dadka Soomaaliyeed heysata. Waxaa cad in kuwa werarka Isbaitaalka aysan dooneyn inay ka qeyb-qaataan geedi socodka nabada Soomaliyeed. Werarkaan ma aha inaba mid lagu gaaraayo ujeedooyin siyaasadeed, amana aha mid ay ogolaan karaan dad biniaadinimo qalbigoodu ku jirto. Isu geeyo, falkaani waa mid ka fog geesinimo.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel. +254 20 762 7132/7133 ama +254 733902020 ama 737400133
Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):
**www.unpos.unmission.org**